

Gacaliyeyaal Waalidiinta / Masuuliyiinta iyo Ardayda,

Dowladda Ontaariyo waxay maanta ku [dhawaaqday](#) in gobolku u dhaqaaqi doono Xannibaadda Heerka Bunniga (GREY Lockdown) maalinta Sabtida, Diisambar 26 si loo sii yareeyo faafitaanka COVID-19.

Gudaha Toronto iyo Koonfurta Ontaariyo inteeda kale, xannibaaddaas waxay kusii jiri doonaan 28 maalmood. Iyada oo qeyb ka ah ogeysiiskan, dowladdu waxay sheegtay in **dhammaan dugsiyada hoose ee Koonfurta Ontaario, oo ay ku jiraan kuwa ka tirsan TDSB, loo xiri doono ardayda illaa Isniinta, Jannaayo 11, halka dhammaan dugsiyada sare loo xiri doono ardayda illaa Isniinta, Jannaayo 25.**

Inta lagu jiro waqtigan, dhammaan iskuulada sida tooska ah loo tegayo waxay u wareegi doonaan waxbarashada fog, halka iskuulada waxbarashada internetka ah ay u sii socon doonaan sidii caadiga ahayd.

Fadlan hoos ka raadso macluumaad dheeri ah oo ku saabsan u wareegidda waxbarashada fog ee dugsiyada TDSB.

## **Dugsiyada Hoose**

**Dugsiyada Sida Tooska ah loo Tegayo:** Ardaydu waxay ku heli doonaan waxbarashada fog gurigooda oo uu u soo dhiibo macalinkooda caadiga ah ee iskuulka. Dugsiyada hoose waxay raaci doonaan jadwalkooda / jadwalkooda caadiga ah. Mararka qaarkood, waxaa laga yaabaa in loo baahdo in waxyaabo yar yar laga beddelo iyada oo lala socodsiiin doono qoysaska maalinta Isniinta, Jannaayo 4.

**Dugsiyada Internetka:** Waxay sii wadi doonaan inay u shaqeeyaan sidii caadiga ahayd.

## **Dugsiyada Sare**

**Dugsiyada Sida Tooska ah Loo Tegayo:** Dugsiyada sare waxay ku shaqeyn doonaan jadwal wax laga beddeley

Waqtiga	Maalinta 1aad	Maalinta 2aad	Maalinta 3aad	Maalinta 4aad
8:45 subaxnimo – 10:00 subaxnimo.	<b><u>Koorsada 1aad</u></b>	<b><u>Koorsada 1aad</u></b>	<b><u>Koorsada 2aad</u></b>	<b><u>Koorsada 2aad</u></b>
	Mideysan (Synchronous)	Mideysan (Synchronous)	Mideysan (Synchronous)	Mideysan (Synchronous)



<b>10 subaxnimo – 10:30 subaxnimo</b>	<b><u>Koorsada 1aad</u></b> Aan Mideysneyn (Asynchronous)  Waxbarashada Madaxa banaan (Independent Learning)	<b><u>Koorsada 1aad</u></b> Aan Mideysneyn (Asynchronous)  Waxbarashada Madaxa banaan (Independent Learning)	<b><u>Koorsada 2aad</u></b> Aan Mideysneyn (Asynchronous)  Waxbarashada Madaxa banaan (Independent Learning)	<b><u>Koorsada 2aad</u></b> Aan Mideysneyn (Asynchronous)  Waxbarashada Madaxa banaan (Independent Learning)
<b>10:30 subaxnimo – 11:45 subaxnimo.</b>	<b><u>Koorsada 1aad</u></b> Mideysan (Synchronous)	<b><u>Koorsada 1aad</u></b> Mideysan (Synchronous)	<b><u>Koorsada 2aad</u></b> Mideysan (Synchronous)	<b><u>Koorsada 2aad</u></b> Mideysan (Synchronous)
<b>11:45 subaxnimo. – 12:30 galabnimo.</b>	<b><u>Koorsada 1aad</u></b> Aan Mideysneyn (Asynchronous)  Waxbarashada Madaxa banaan (independent Learning)	<b><u>Koorsada 1aad</u></b> Aan Mideysneyn (Asynchronous)  Waxbarashada Madaxa banaan (independent Learning)	<b><u>Koorsada 2aad</u></b> Aan Mideysneyn (Asynchronous)  Waxbarashada Madaxa banaan (independent Learning)	<b><u>Koorsada 2aad</u></b> Aan Mideysneyn (Asynchronous)  Waxbarashada Madaxa banaan (independent Learning)
<b>12:30 galabnimo – 1:10 galabnimo.</b>	<b>Qado</b>			
<b>1:10 galabnimo.. – 2:00 galabnimo.</b>	<b>APA/PMA</b>			
<b>2:00 galabnimo – 3:15 galabnimo.</b>	<b><u>Koorsada 2aad</u></b> Mideysan (Synchronous)	<b><u>Koorsada 2aad</u></b> Mideysan (Synchronous)	<b><u>Koorsada 1aad</u></b> Mideysan (Synchronous)	<b><u>Koorsada 1aad</u></b> Mideysan (Synchronous)

*Xusuusin: Fasalka xilliga 1aad wuxuu sii socon doonaa 8:45 subaxnimo ilaa 12:30 galabnimo, waxaana ku jiri doonaa 150 daqiiqo oo waxbarasho mideysan / waxbarasho Internetka ah (synchronous/online learning) iyo 75 daqiiqo oo waxbarasho Aan Mideysneyn/Waxbarashada Madaxa bannaan (Asynchronous/Independent Learning). Macallimiintu waxay ku bilaabi doonaan waxbarashada mideysan/waxbarashada Internet ah (synchronous/online learning) ah 8:45 subaxnimo. Waqtiyada waxbarashada Aan Mideysneyn (asynchronous) ee jadwalka kore waxay tusaale u yihiin sida waqtiyada Aan Mideysneyn (asynchronous) loo qorsheyn karo. Macallimiintu waxay adeegsan doonaan aqoontooda xirfadeed si ay u go'aamiyaan sida loo qorsheynayo waqtiyada Mideysan(synchronous) iyo kuwa Aan Mideysney (Asynchronous).*

**Dugsiyada Internetka:** Waxay u sii socon doonaan inay u shaqeeyaan sidii caadiga ahayd.

## **Dugsiyada EdVance iyo Kuwa Dadka Waaweyn ee Maalinta**

**Iskuulada Sida Tooska ah Loo Tegayo:** Ardayda dhigata Dugsiyada Dadka Waaweyn ee Maalintii iyo barnaamijyada EdVance waxay raaci doona jadwalkaan khadka tooska ee onlineka ah:

	<b><u>Maalinta 1aad</u></b>	<b><u>Maalinta 2aad</u></b>	<b><u>Maalinta 3aad</u></b>	<b><u>Maalinta 4aad</u></b>
<b><u>Xiisadda 1: 3 saac</u></b>	<b><u>1AB</u></b> <b><u>Mideysan</u></b> <b><u>(Synchronous)</u></b>	<b><u>1AB</u></b> <b><u>Mideysan</u></b> <b><u>(Synchronous)</u></b>	<b><u>2AB</u></b> <b><u>Mideysan</u></b> <b><u>(Synchronous)</u></b>	<b><u>2AB</u></b> <b><u>Mideysan</u></b> <b><u>(Synchronous)</u></b>
<b><u>Xiisadda 2: 1 saac</u></b>	<b><u>2AB</u></b> <b><u>Mideysan</u></b> <b><u>(Synchronous)</u></b>	<b><u>2AB</u></b> <b><u>Mideysan</u></b> <b><u>(Synchronous)</u></b>	<b><u>1AB</u></b> <b><u>Mideysan</u></b> <b><u>(Synchronous)</u></b>	<b><u>1AB</u></b> <b><u>Mideysan</u></b> <b><u>(Synchronous)</u></b>
<b><u>Xiisadda 3: 2 saac</u></b>	<b><u>3AB</u></b> <b><u>Mideysan</u></b> <b><u>(Synchronous)</u></b>	<b><u>3AB</u></b> <b><u>Mideysan</u></b> <b><u>(Synchronous)</u></b>	<b><u>3AB</u></b> <b><u>Mideysan</u></b> <b><u>(Synchronous)</u></b>	<b><u>3AB</u></b> <b><u>Mideysan</u></b> <b><u>(Synchronous)</u></b>

Waqtiyada ay bilaabanayaan iyo waqtiyada qadada waxay isku mid noqonayaan iskuul kasta.

**Waxbarashada Internetka:** Waxay usii socon doontaa inuu u shaqeeyo sidii caadiga ahayd

## **Iskuulada / Barnaamijyada Kale**

**Iskuulada Sida Tooska ah Loo Tegayo:** Iskuulada aan isticmaalin jadwal la qabsiga ee Guddoonku soo saaray (sida iskuulada kale ee barnaamijyada ah, barnaamijyada isku dhafka ah, ISPs iwm.) Waxay fulin doonaan jadwalka internetka ee fog ee deegaanka laga hirgeliyey.

**Waxbarashada Internetka:** Wuxuu u sii wadi doonaa inuu u shaqeeyo sidii caadiga ahayd.

## **Goobaha Isku-dhafaan ee Waxbarashada Gaarka ah**

Goobaha isku dhafaan (hoos ku qoran) waxay hirgelin doonaan jadwalka waxbarashada fog ee Internetka ee deegaanka laga hirgeliyey.

**Goobaha Isku dhafaan ee Dugsiyada Hoose:** Beverly School, Lucy McCormick Senior School, Seneca School, Sunny View Jr. & Sr. PS, Parklane PS, William J. McCordic School



**Goobaha Isku dhafan ee Dugsiyada Sare:** Central Etobicoke, Drewry Secondary School, Frank Oke, Maplewood High School, Sir William Osler, York Humber HS

Fadlan la soco inay qayb ka mid ah tahay dadaalka dowladda ee ku aaddan daryeelka dadka nugulka ah, guddoonnada waxbarashadu, haddii ay suurtagal tahay, inay si shakhsi ahaan ah u siiyaan ardayda leh baahiyaha waxbarashada khaaska ah ee aan lagu meeleyn karin waxbarashada fog ee internetka ee la xiriirta baahida ardayda. Fadlan la hadal maamulaha Iskuulka ilmahaaga haddii aad rumaysan tahay in arrintan loo baahan yahay.

## **Barnaamijyada Daryeelka Carruurta / Barnaamij Maalmeedka ee Dheeraadka ah**

Dhammaan barnaamijyada daryeelka carruurta ee u adeegaya dhallaanka, socod-baradka iyo carruurta da'da dugsiya-barbaarinta aan gaarin ee deegaanka dugsiyada TDSB ayaa loo oggolaan doonaa inay sii furnaadaan inta lagu jiro muddada Xannibaadda, si kastaba ha noqotee waalidiinta / dadka ardayda masuulka ka ah waa inay u xaqiijiyaan faahfaahinta baahida gaarka ee daryeelka carruurta. In kasta oo dugsiyadu xiran yihiin, dhammaan Barnaamij Maalmeedyada ee Dheeraadka ah ee TDSB iyo Barnaamijyada Dugsiyada ee saacadaha hore iyo saacadaha dambe, sidoo kale waa la xiri doonaa.

## **Tallaabooyinka Xiga**

In kasta oo TDSB ay ardayda u qaybisay in ka badan 70,000 oo qalab ah sannadkan, waxaan ogsoonahay in ardayda qaarkood ay weli u baahan karaan qalab muddadan waxbarashada fog ee Internetka. Xaaladahaas, qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay la xiriiraan dugsigooda marka u furmo si loogu diyaariyo qalabkan. Fadlan la soco in qalabkan lagu bixin doono iyadoo lagu saleynayo helitaanka waxayna qaadan kartaa waqti in la qaybiyo.

Warkan maanta wuxuu baxayaa waqti ay dhamaan iskuulladu ku jiraan fasaxa qaboobaha, taas oo keeneysa dhibaato sida aan u ogahay in badan oo idinka mid ah laga yaabo inay su'aalo ka qabaan talaabooyinka xiga. Iskuulada sida tooska ah loo tegayo, macalimiintu waxay la xiriiri doonaan ardayda iyo qoysaska maalinta Isniinta, Jannaayo 4 si ay u siiyaan macluumaad dheeri ah oo ay bilaabaan, waxaa lafilayo inay noqdaan, howsha degdega ah ee u wareegida waxbarashada fog ee internetka ah. Ardayda dhigata iskuulka internetka ee wax lagu barto, waxbarashadu waxay u sii socon doontaa sidii caadiga ahayd maalinta Isniinta, 4ta Jannaayo.

In kasta oo aan la filayn, haddana waan ogahay in warkan ku adkaan doono dad badan. Waxaan rabaa inaan idiin xaqiijiyo inaan wax badan ka baranay waxbarashada fog ee internetka 9-kii bilood ee la soo dhaafay in kasta oo ay weli jiraan caqabado hortaagan, waxaan taageeri doonaa ardaydeenna iyo qoysaskeenna si aan u hubinno sida ugu fudud ee fulinta isbeddelkaas ee suurtoogalka ah

Daacadnimo,



Kathy Witherow

Agaasimaha Ku Meelgaarka ah ee Waxbarashada.

